

# Ma u baahan tahay inaad aragto dhakhtar?

Qof kasta oo ku nool England wuxuu xaq u leeyahay inuu iska diiwaan geliyo GP (Guud) qalliinka dhakhtarka, iyadoon loo eegin xaaladda socdaalka ama aan lahayn cinwaan go'an.

Wax badan ka ogow gudaha >>



## Miyaan u baahanahay dukumeenti si aan iskaga diiwaan geliyo GP?

### Maya. Uma baahnid:

- Caddaynta ciwaanka
- Caddaynta aqoonsiga (ID)
- Nambarkaaga NHS-ta
- Wixii kale oo dukumeenti ah

## Maxay xarunta caafimaadka GP-gu u diidi artaa inay i diiwaan geliso?

Xarunta caafimaadku waxay noqon kartaa mid aad uga fog gurigaaga oo waxaad u baahan tahay booqashooyinka guriga, ama qaliinka ayaa buuxa.

Xarunta caafimaadku kuma diidi karto inay ku diiwaangeliso sababtoo ah ma aadan haysan dukumeenti ama cinwaan, ama xaalad socdaal oo gaar ah.

Isticmaal xidhiidhkan si aad u ogaato in xarunta caafimaadka GP-gu ay buuxdo:

<https://www.nhs.uk/Service-Search/find-a-gp>

## Maxaan sameeyaa haddii xarunta caafimaadka GP-ga ay diido inay i diiwaan geliso?

Haddii ay weli diidaan inay ku diwaan geliyaan, naga soo wac **020 8888 0579** ama Dhakhaatiirta Adduunka telefoon bilaash ah **0808 1647 686** (10 subaxnimo ilaa 12 duhurnimo Isniinta ilaa Khamiista).

## Ma inaan lacag bixiyaa si aan u arko GP?

Maya. Wax lacag ah laguma qaadayo. Qofna waa inaan la waydiin inuu lacag bixiyo si uu iskaga diwaangeliyo GP-ga ama u arko GP, oo ay ku jiraan dadka soogalootiga ah.

## Ma ka heli karaa caawimaad foomka diiwaangelinta?

Haddii ay kugu adag tahay wax-akhris ama qoris, ama Ingiriisigu aanu ahayn luqadaada koowaad, dhakhtarka GP-ga waa inuu kaa caawiyo buuxinta foomka diiwaangelinta. Waxaad xaq u leedahay turjubaan haddii aad mid u baahan tahay.

## Ma inaan caddeeyaa sharcigayga socdaalka?

Maya, uma baahnid inaad ka jawaabto mid ka mid ah su'aalaha ku saabsan xaaladdaada socdaalka ee foomka diiwaangelinta. Su'aalahani waa 'ikhtiyaari' waana laga tagi karaa madhan.

## Waa maxay xarun caafimaad oo badbaado leh?

'Xarun caafimaad oo badbaado leh' waa qalliin GP-ga ah kaas oo samaynaya wax kasta oo ay awoodaan si ay u noqoto mid soo dhawaynaysa oo ay heli karaan muhaajiriinta iyo qaxootiga. Nala soo xidhiidh si aad wax badan uga ogaato xarumaha caafimaadka ee Badbaadada ah ee Haringey.

Kaarkan  
diiwaangelinta  
GP-ga waxa  
soo saartay  
NHS.



**I have the right to register and  
receive treatment from a GP practice**

I do not need a fixed address.

I do not need identification.

Anyone in England can see a GP.

## La xirir Healthwatch Haringey



**Taleefanka:** 020 8888 0579



**limayl:** [info@healthwatchharingey.org.uk](mailto:info@healthwatchharingey.org.uk)



**Website:** [www.healthwatchharingey.org.uk](http://www.healthwatchharingey.org.uk)

Ula shaqaynaya si iskaashi ah:

